**Jamhuuriyada Somaliland**
**Dawladda Hoose Hargeysa**
**Xafiiska Duqa Caasimada**

**Republic of Somaliland**
**Municipality of Hargeisa**
**Mayor's Office**

**Go'aan Lr: 254/2024.**

**Date: 11th March 2024.**

## Go'aan Guddi Fulineed.

Shir ay isugu yimaadeen guddida fulinta Caasimada Hargeysa 11th March 2024, Shir Guddoomiyena uu ka yahay Duqa Caasimada Hargaysa Mudane **(C/kariim Axmed Mooge),** kuna saabsanayd Tirtirid/Cencelid Faylka TR-lambarkiidu yahay **17778,** Dood & falan-qayn dheer ka dib.

### Guddida Fulintu:-

| | |
|---|---|
| **Markay Arkeen** | Sharciga Maamulka Gobolada & Degmooyinka JSL ee Xeer No: 23/2019. |
| **Markay Arkeen** | Warbixinta tixraaceedu yahay **DHH/DIK/149/2024,** kuna taariikhaysan **24/1/2024,** ujeedadeeduna tahay Warbixin dhul, kana soo baxday Guddoomiyaha Degmada I/Koodbuur. |
| **Markay Oggaadeen** | Warbixinta tixraaceedu yahay **DH/AGDHDHH/224/2024,** kuna taariikhaysan **04/03/2024,** ujeedadeeduna warbixin dhul, kana soo baxday Xafiiska Aggaasimaha Waaxda Dhulka Dawladda Hoose ee Hargeysa, warbixintan oo tilmaamaysa in la tirtiro faylka TR-kiisu yahay 17778, maadama aanu qorshaha waafaqsanayn. |
| **Markay Xaqiiqsadeen** | In ay haboon tahay in in la tirtiro faylkan, maadama oo faylkani noqday waddo, isla markaana uu xanibay faylal kale. |
| **Markay Tixgeliyeen** | Tallada Masuuliyiinta ay hawshani khusayso. |

### Waxa ay Go'aansadeen :-

Ka dib markey arkeen dhamaan asbaabaha sare ku xusan, Gudida Fulintu waxa ay Go'aansadeen in la Tirtiro faylka TR-Lambarkiisu yahay **17778,** kaas oo ay ku qoran yihiin muwaadiniinta kala ah **(Xamse Khadar Cali & Mukhtaar Muuse Xasan),** cabirkiisuna dhan yahay 4.20+31/2X58+48/2m, kuna yaala Degmada **I/Koodbuur,** isla markaana laga saari doono system-ka, maadama aanu faylkani qorshaha waafaqsanayn uu waddo dhex yaalo.

**Allah Mahad leh.**

**(Siciid Nuur Jaamac).**
**Xoghayaha Fulinta D/Hoose ee Hargeysa.**

**(Khadar Axmed Cumar 'Khadar Nuur').**
**Ku-xigeenka Duqa Caasimada Hargaysa.**

**(C/kariim Axmed Mooge).**
**Duqa Caasimada Hargeysa, ahna Gudd/**
**Golaha Degaanka Caasimada Hargeysa.**

Email: MayorOffice2021@gmail.com Hargeysa, Somaliland.

Jamhuuriyada Somaliland
Dawlada Hoose Hargeysa

Republic Of Somaliland
Municipality Of Hargeisa

**Xafiiska Aggasimaha Waaxda Dhulka**

Ref/DH/AGDHDHH/-224/2024.

Date: -04/3/2024

KU: Duqa Caasimda Jsl =Hargeysa=
OG: Xoghayaha dawlada hoose =Hargeysa=
OG: K/Xigeenka Duqa Caasimada =Hargeysa=

## Ujeedo: warbixin-dhul

**Mudane Mayor**

Waxan halkan kuugu soo gubinayaa warbixin dhul ku yaala degmada I/K/Buur gaar ahaan xaafada jigjiga yar kuna qoranyahay muwaadinka magaciisu yahay C/LADIIF C/LAAHI ISMACIIL TR; 44460 kana soo warbixiyey M/Qorshaha iyo fidinta caasimada Arch; Amiin Abdi Ahmed

Hadaba waa dhul qorshaha waafaqsan sida ku cad warbixinta degmada balse TR; 17778 uu dhex yaalo waddo una baahanyahay in la tirtiro sababtuna waa fayl taagan oo aan dhamaanin.

Sidaad darteed maayer waxan soo jeedinayaa in in la tirtiro faylkaas aan qorshaha waafaqsanayn.

**Allaah madad leh**

DAWLADDA HOOSE EE HARGEYSA
AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA
DHH
DIRECTOR OF THE LAND DEPARTMENT

**Maxamed Yuusuf Cismaan**
**Aggasimaha Waxda Dhulka**

Email.MohamedYusuf@dhhgov.org Hargeysa

Ku: G. A. [illegible]
faylka la [illegible] ha la soo xareeyo.
06/03/2024

To- M. yare
fadlan coverks
u saar
[signature] 02/03/2024

Jamhuuriyada Somaliland
Dawlada Hoose Hargeysa

Republic Of Somaliland
Municipality Of Hargeisa

Xafiiska Qorshaha & Fidinta Caasimadda D.H.H

Date: 29/02/2024

Ref/DH/QFDDH/0019/2024.

=Hargeysa=

KU: Agaasimaha Waaxda Dhulka D.H.H

## Ujeeedo: Warbixin Dhul Qorshaha waafaqsan

Mudane agaasime haddan kaga warbixiyo dhulka ku yaala degmadda I.koodbuur gaara ahaan xafada jigjiga yare uuna leeyahay **Cabdiladiif Cabdilaahi Ismaaciil**
**Tr-44460** waxaanan kusoo arkay goobta markan tagay sidan;
Waa dhul qorsha waafaqsan sida ku cad warbixinta degmada balse trka(**TR_17778**) kale uu waddo dhex yaal una baahan yahay in la tirtiro sababta oo ah waa fayl taagan oo aan dhammaanin.
Sidaa darted mudane agaasime waxaan ku talinayaa in aynu tiritro faylkaas oo aan qorshaha waafaqsanayn.

***FG***: *waddada TR-44460 horta degmaddu qayb ka midaa way ubaneeyeen practical ahaan*

DAWLADDA HOOSE
EE HARGEYSA
D.H.H
HARGEISA LOCAL GOVERMENT
MADAXA QORSHAHA
& FIDINTA CAASIMADDA

**Arch: Amiin Abdi Axmd**
**M/Qorshaha & Fidinta Caasimadda**

Email.Amiinabdi880@gmail.com Hargeisa

Jamhuuriyadda Somaliland
Dawladda Hoose Hargeysa
Gudd-Degmada I/Koodbuur

GOLAHA DEEGAANKA EE CAASIMADDA HARGEYSA
D.H.H
HARGEISA LOCAL GOVERNMENT
HARGEISA LOCAL COUNCIL

Republic Of Somaliland
Municipality Of Hargeisa
Chairman of District Ik/Bur

TIX:- DHH/DIK/ 1119 /2024.
Date:- 24/1/2024.

Ku:- Duqa Caasimadda . =Hargeisa=
Og:- Xoghayaha Fulinta D/Hoose. =Hargeisa=
Og;- Ku-xigeenkaDuqa Caasimadda–JSL. = Hargyis=

## UJ:- Warbixin Dhul.

**Mudane maayir**

Tirax waqada sumdeedu Tahay DHH/DIK--------2024.kuna Tarkhisan 24/1/2024.Ujeedeeduna ahyed Warbixin dhul kana soo baxady madax qorshaha degmada ibaraahim koodbuur.

Hadaba mudane maayir Sida uu madax qorshuhu soo cadeeyey waxaan halkan kugu soo warbixinta Tr-44460 kaasi uu qoran yahay (cabdiladiif c/laahi ismciill) goobtani waa dhul qorshaha waafaqsan waxaa jirta in wadda koonfurta ka marta oo ah xad laba beerod uu yaalo Tr-17778 kaasi oo aan qorshaha waafaqsanyen waxaa uu dhex yaala waddo faylkan wuu taagan yahay.

Sidaasi mudane maayir madaama uu faylku dhex yaalo waado dhexdeed in la tirtiro madaama aanu qorshaha waafaqsanyeyn.

Allaa Mahad Leh

( Mustafe Ibraahim Aadan )
Guddoomiyaha Degmada IK/Buur

Hargeisa

GUDDOOMIYAHA DEGMADA IBRAAHIM KOODBUUR
DOWLADA HOOSE EE HARGEISA

Aqqaasimah u dhulka

Waxaanu Codsanaynaa oo Meeshan Qorshe ahaan Qasan, inaad u dirto Madax qaybta Qorshaha

Eng. Handulle

To: Amiin

Hubsi, qorshaha sidii loo xia koro, adiga qorsha fulinije

18th.02.2024.

Jamhuuriyadda Somaliland
Dawladda Hoose Hargeysa
Gudd-Degmada I/Kodbuur

Republic Of Somaliland
Municipality Of Hargeisa
Chairmen Of District I/Kodbur

TIX:- DHH/DIK/_______/2024.
Date:- 24/1/2024.

**Ku:- Guddoomiyaha Degmada IK/Buur. =Hargeisa=**

## UJ:- Warbixin Dhul.

Guddoomiye:-

Waxaan halkan kugu soo gudbinyaa warbixinta **Tr-no;44460** kaasi u uku qoran yahay **(C/ladiif C/laahi ismccil** ) goobtan waa fayel dhamays tiran oo qorshah waafaq san waxaa jirta in wadda koonfur ka martaa oo xad laba beerood uu yaalo **Tr/no;17778** kaasi oo aan qorshaha waafaqsanyeyn waxaau dhex yaala waddo faylkuna wuu taagan yahay

Sidaasi; darteed Guddomiye waxaa uu bahan yahay in fayelka wadda dhex yaala laga tirtiro Meesha maadama aanu qorshah waafaq sanyen

**Allaa Mahad Leh**

**Eng:- ( Max'ed Cabdi Ismaaciil )**
**Madaxa Qorshaha Degmada IK/Buur**
**Hargeisa**